



Turjubaanka


Goobaha Caafimaadka Medicaid

(Interpretation for Medicaid Services)

Haddii adiga ama qof ka tirsan qoyskaaga aad haysataan ceymiska Wisconsin Medicaid oo aad ku hadashaan luuqad kale oo aan ahayn afka Ingiriiska, afka dhegoolaha ama suul-dhabaalaha, waxaad xaq u leedihiin in ballan kasta la idiin diyaariyo turjubaan lacag la'aan ah. Turjubaanku waxa uu kugu caawinayaa in aad si fiican u fahanto oo aad la hadasho dhakhtarka.

WAXAAD FILANEYSO

Sawiro calaamaddan si aad u aragto fiidiyow ah tarjumaadda macluumaadkan oo ah American Sign Language (Luqadda Dhagoolaha Mareykanka ama ASL).



► Muxuu sameyn doonaa turjubaanku?

Marka Dhakhtarku kuu helo turjubaan, turjubaanku waxa uu:

- Ballantaada uga soo qeygelayaa si shakhsi ah, khadka taleefanka, ama hab kale oo ah shaashad.
- Kuu turjumayaa hadalka idin dhex maraya adiga iyo dhaktarka, shaqadiisu waa turjumaad keliya.

► Waa maxay sababta aan u isticmaalayo turjubaanka?

- Waxaad ku hadli kartaa afkaaga hooyo ama luuqad kale oo aad si fiican ugu hadli karto.
- Waxaa lagu dhowrayaa macluumaadkaaga caafimaadka—turjubaanka waxaa khasab ku ah in uu sida dhakhtarka oo kale raaco sharciyada dhowrista xogta qof kasta.
- Turjubaanku waa xirfadle aqoon u leh ereyada caafimaadka ee dhaktarka lagu isticmaalayo.
- Turjubaanka lagu keenayo adigu lacag kuma bixineysid.



Codsiga turjubaanka

Khasab miyey igu tahay in aan isticmaalo turjubaan?

Maya, khasab kuguma aha in aad isticmaasho turjubaan. Hase ahaatee, dhakhtarka ayaa turjubaan kuu diyaarinaya haddii aad u baahan tahay.

Goorma ayaan codsan karaa turjubaanka?

Waa in aad adigu codsato turjubaan mar kasta oo aad la soo xiriirto dhakhtarka oo aad ballan ka qabsaneyso. Haddii aad codsaneyso waxyaabo gaar ah, dhakhtarka u sheeg markaad ballanta qabsaneyso. Dhakhtarka ayaa feylkaaga ku qoran kara in ballamaha mustaqbalka turjubaan lagu diyaariyo.

Sidee baan turjubaanka u codsan karaa?

Haddii aad taleefan soo dirto, u sheego in aad turjubaan u baahan tahay iyo luuqadda aad ku hadasho. Haddii aad ballanta ku qabsaneyso intarnetka, waxaad ku arki kartaa hab aad ku codsan karto luuqadda aad rabto.

Maxaa dhacaya haddii aan la ii keenin turjubaan ama la ii sheego in aan turjubaan la ii heli karin?

Turjubaanku waa xuquuq luqadeed oo aad si bilaash ah ugu heli karto ballamahaaga Medicaid. Dhakhtarku marna qof qoyskaaga ka mid ah uma isticmaali karo in uu kuu noqdo turjubaan. Haddii ay shaqaalaha caafimaadka kuu diidaan turjubaan ama ay kuu sheegaan in aad keensato turjubaan kuu gaar ah, waxaad dacwad u soo gudbin kartaa dhowr siyaabood oo kala duwan:

- Haddii ceymiskaagu leeyahay urur ah HMO, waa in aad la xiriirto maamulaha HMO ama qofka u qareema dadka HMO si aad ugu sheegto wax kasta oo la xiriira helitaanka turjubaanka. Sida loola xiriiro HMO kasta, ka eego www.dhs.wisconsin.gov/badgercareplus/member-info.htm.
- Haddii uusan ceymiskaagu lahayn HMO, waxaad u sheegi kartaa wixii dhibaato ah oo la xiriira helitaanka turjubaanka Xafiiska Macaamiisha Medicaid adigoo soo garaacaya 800-362-3002.
- Waxa kale oo aad la xiriiri kartaa Wisconsin Department of Health Services Civil Rights Coordinator (Xiriiriyaha Xuquuqda Madaniga ah ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka) dhsarc@dhs.wisconsin.gov ama soo garaac 608-267-4955 si aad ugu soo sheegto dhibaato kasta oo la xiriirta helitaanka turjubaanka.